# TILMAANTA KALA SOCIDA QASHINKA – SIDATAN U KALA SOC

| Somaliska | Qashinka raashinka | Qashinka noocyaha kale ah | Baakadaha blaastikada laga sameeyay | Baakadaha xaanshida laga sameeyay | Xaanshiyadaha wargeysyada/ Xaanshiyadaha dib loo celiyo | Baakadaha dhalada ka samaysan ee midabka leh | Baakadaha dhalada ka samaysan ee aan midabka lahayn | Baakadaha biraha ka samaysan |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Ma dhib badna!** |  |  |  |  |  |  |  |  |
| **Tusaalooyinka noocyaha qashinka** | Qolofta khudaarta, miraha iyo xididaha, hilib- kalluun- iyo cuntada badda, baasto, geesaha rootiga, caleenta shaaha, haraaga ubaxa iwm. | Xafaayadaha, carrada yaanyuurta, kiishka huufarka, baqshadaha, tirtireha jikada, dhaladooda suufka, dharka iyo kabaha dugoobay, ciidda ubaxa (waa haddii aysan badnayn) iwm | Dhalooyinka yanyada, sanduuqyada dhalada ka samaysan, dhalooyinka shaambada iwm, nacnaca iyo bataatiga, baakada qabow jeexan, tuubooyinka daawada cadayga, bac, baakadaha goomaha ka samysan, iwm | Baakadaha caanaha, garoor iyo labenka, baakadaha ku jireen waxa galayda ka samaysnaa, ukunta, baakadaha, oomada, baakadaha dhexdhexaadka, baakadaha pizzada, warqadaha wax lagu duubo, bacaha xaanshida ka samaysan iwm | Wargeysyada maalinleha iyo kuwa toddobaadyada, buugaagga waawayn, buugagga jeebka, warqadha xayeeysiinta, xaanshiyadaha iwm | Dhallooyinka iyo qasacyadaha ka samaysan dhalada midabka leh. | Dhallooyinka iyo qasacyadaha ka samaysan dhalada aan midabka lahayn. | Daboolada, daboolada dhallooyinka, birta aluuminium, daasadaha iyo khasacadaha, tubooyinka biraha ka sameeysan iwm |
| **Sidee baa qashinka la yeeli doonaa?**<br><br>Laga soo xigsaday: www.ftiab.se www.jonkoping energi.se | Qashinka raashinka waxaa loo dirir doonaa warshad shidaalka dabiiciga soo saarta ee ku taalla degmada Torsvik. Shidaalka noocaas ah wax la adeegsan doono basaska iyo gaadiidka Dowladda hoose. | Waxaa loo dira warshada kaddib loo roga koronto iyo shay guryaha degmada lagu kuleeleeyo. | Xilliga dib u warshadaynta waxa laga sooca bacda culus iyo baca qafiifka ah, wuxuuna soo saarka noqda bac cusub. Tusaale, saabanada, bacda wax lagu qaato, weelasha dhirt iwm. | Baakadaha xaanshida laga sameeyayna waa la soo uruuriyaa, laka soocaa kaddib laysku habeeyaa kaddib loo dira warshad xaanshiyaha soo saarta. Waxaa laga saara bac iyo macdanta. Nattiijada warshadaynta waxay noqota xaansho cusub. | Xaanshiyadaha wargeysyada goob ayaa laysugu keena kaddib waxaa la geeyaa goob lagu kala sooco kaddib laysku habeeyo. Kaddib waxaa loo rara warshad ka soo saarta xanshiyo cusub. | Kaddib markii goob laysugu geeyo waxyaalaha dhallooyinka ka sameeysan, ayaa la geeyaa warshad burburisa oo kala soocda. Dhallooyinka cusub waxaa siiba lagu isticmaala baakadaha dhalada ka sameeysan. | Kaddib markii goob laysugu geeyo waxyaalaha dhallooyinka ka sameeysan, ayaa la geeyaa warshad burburisa oo kala soocda. Dhallooyinka kala midabka ah waa in laka sooca maxaayeelay waxay wax yeelayaan tayada dhalooyinka cusub. | Aluuminiumyada iyo baakadaha biraha ka sameeysan gooni gooni ayaa loo kala sooca, kahor inta aan la dhalaalinin oo laga soo saarin soo saar cusub. |
| **Fiican in laga fekero** | Bacda waa in laysku laablaaba. Buuxi ilaa halka calamadaysan. | Bacda waa in afka laga xira. | Baakadahana biyo dhex raacsii. | Baakadaha isku keen kahor intii aadan tuurin. | Baqshadaha iwm waxaa loo tuura sida qashinada oo kale. | Dhalooyinka iyo khasacadaha waa in ay ahaadaan faaruq. Daaboolada waa in la kala sooca, nooc kasta ha ahaadeen. Dhalooyinka rahamka waa in loo celiyaa halka laga soo iibsaday. | Dhalooyinka iyo khasacadaha waa in ay ahaadaan faaruq. Daaboolada waa in la kala sooca, nooc kasta ha ahaadeen. Dhalooyinka rahamka waa in loo celiyaa halka laga soo iibsaday. | Baakadaha biyo raacsii kahor inta aadan tuurin. Khasacyada rahamka waa in loo celiyaa halka laga soo iibsaday. |

2018-09

June Avfall & Miljö